


2025

ABAARAHA

GOBOLKA AWDAL

WARBIXIN / REPORT 1.1



khayr.so



+3185 800 3005



Kalmad Ambassador-ka

Aniga oo ku hadlaya magaca Khayr Foundation, waxaa sharaf ii ah in aan kula wadaago warbixintan ku saabsan gurmada degdegga ah ee ay hay'addu ka fulisay gobolka Awdal, Somaliland intii lagu jiray abaarta ba'an ee halkaas ka dhacday.

Bulshada ku nool deegaannada Seemaal, Boodhka, Baysaare, Kaxda iyo Duuble waxay la tacaalayeen xaalad nololeed oo aad u adag, hase yeeshee Khayr Foundation waxay si dhaqso leh u gaarsiisay gargaar naf-badbaadin ah oo isugu jiray biyo, raashin iyo bustooyin.

Farxadda iyo mahadcelinta ka muuqatay dadka la gaarsiiyey deeqdan waxay markhaati u tahay sida taageerada samafal ee waqtigeeda ku timaaddaa ay u beddeli karto rajo iyo nafiis.

Waxaan u mahadcelinayaa dhammaan taageerayaasha iyo walaalaha ka qeyb qaatay gurmada, Alle ajar haka siiyo.

Farhan Hashi Abdilahi
Ambassador-ka Khayr Foundation
ee Somaliland





والله في عون العبد ما كان العبد في عون أخيه.

Alle wuxuu caawiyaa addoonka
inta uu caawinayo walaalkiis.

xadiis Saxiix Ah:

Hordhac






Gobolka Awdal ayaa muddooyinkii u dambeeyey wajahaya abaar ba'an oo saamayn xooggan ku yeeshay nolosha bulshada, gaar ahaan dhinacyada biyo la'aanta, cunto yaraanta, iyo hoyga.

Xaaladdan adag ayaa ku qasabtay qoysas badan in ay la tacaalaan gaajo, haraad iyo xaalado nololeed oo aad u liita. Khayr Foundation, oo mar walba ka go'an inay la garab istaagto bulshada nugul, waxay qaadday tallaabo degdeg ah oo lagu yareynayo saameynta abaarta, iyadoo ujeedadeedu ahayd in la badbaadiyo naf iyo xoolo.



Waxqabadka la Fuliyey

Gurmadka Khayr Foundation waxa uu si toos ah loo gaarsiiyey deegaamada:



Waxqabadka ugu muhiimsan ee la sameeyey waxaa ka mid ahaa:

1

Biyo nadiif ah:

booyado oo biyo ah ayaa loo qaybiyey bulshooyinka, si wax looga qabto haraadka iyo xaaladda adag ee biyo la'aanta.



Deeq:

deeq ka daboolaysa baahiyaha ugu aasaasiga ah ee nololeed.

2

3

Hoy iyo bustooyin:

Waxaa la gaarsiiyey bustooyin iyo bacaha, si ay uga helaan dabool iyo nasasho xilliyada habeenkii.



GUULAHA LA GAARAY

Hadafka Gurmadka

1- In si degdeg ah loo badbaadiyo qoysaska ku jira xaaladda halista ah.

2- In la yareeyo saamaynta abaarta ee dhinacyada biyo la'aanta iyo hoy la'aanta.

3- In la xoojiyo niyadda bulshada, iyadoo la tusayo in aysan kaligood ahayn ee ay haystaan walaalo u gurmanaya.



Natiijada la gaaray

- Carruurtii waxay heleen biyo nadiif ah oo ay cabbaan, taas oo yareysay haraadkii iyo daal badan oo ay la kulmeen.
- Hooyooyinkii iyo waayeelkii waxay muujiyeen mahadnaq iyo raynrayn, maadaama bustooyinkii iyo raashinkii ay ku noqdeen nafis degdeg ah.





Gunaanad

Gurmadka Khayr Foundation ee gobolka Awdal wuxuu noqday tallaabo wax ku ool ah oo naf-badbaadin ah, isagoo gaarsiiyey taageero degdeg ah boqolaal qof oo xaalad adag ku sugnaa.

Biyaha waa nolosha oo dhan –
marka biyo la waayo, nololna ma jirto.

